Mas’uuliyadahaaga iyo waxaad samaynayso haddii aad dhibaato ku qabto hoygaaga

Abril 2010

Somali

Hoyga ay bixiyaan Hoom Ofisku (ooh ore loogu yaqaanay hoyga NASS) waa inuu yahay nadiif, lagu noolaan karo oo ammaan ah.

Hoygaygu waa inuu yeesho nidaamka badbaadinta dabka oo ku filan oo waa in aanu suyuc ahayn ama aanu baahnayn dayactir weyn.

Xaashidan waxay qeexaysaa xuquuqdaada iyo xilkaaga, xilka cidda guriga ku siisay, waxaad samaynayso haddii aad dhibaato qabto iyo sida aan kuu caawin karno.

Waa maxay xilkaygu inta aan ku noolahay hoygan?

Waa in aad:

- Hoygaaga nadiif ka dhigto oo dhawrto qalbka ay alaabta lagu siiyey;
- Dayactirto hantida iyo jiidda dadka ka dhaxaysa. Tusaale, hubinta in jaranjaradu nadiif tahay oo aanay oolin alaab, dhar ama waxyaabo kale;
- Qubto qashinka guriga si sax ah. Taas waxa ku jira ku faaruqinta weelka qashinka meesha loogu talogalay;
- Codasto oo ka hesho ruqsad qoraal ah Hoom Ofis haddii ay marti ku dhaxayso **kahor** intaanad u oggolaan inay cidi kula joogto;
- Codasto oo ka hesho ruqsad Hoom Ofis **kahor** intaanad hoygaaga ka maqnaan in ka badan 14 maalmood (isku darkal) muddo lix-bil gudahood. Haddii aanad helin ruqsadan kahor ka tegista hoyga, tani waxay keeni kartaa inaad lumiso hoygaaga;
- **Soo sheegto hantiilaha wixii dhibaatooyin** hantida ka jira **sida ugu dhakhso badan ee suurtagal ah;** iyo
- U oggolaato hantiilaha gelitaanka guriga si loo dayactiro ama wax looga hagaajiyo.

Scottish Refugee Council, 5 Cadogan Square, (170 Blythswood Court), Glasgow G2 7PH Tel: 0141 248 9799, Fax: 0141 243 2499,
www.scottishrefugeecouncil.org.uk
Scottish Refugee Council is a charity registered in Scotland.
Registered Charity: SC008639

Maxaan samaynayaa haddii aan dhibaato ku qabo hoygayga?

Haddii aad dhibaato ku qabto hoygaaga, waa inaad soo wargeliso hantiilaha marka hore. Hantiilaha hoygaaga waa inay ku siiyeen meesha lagala soo xidhiidhayo markii aad u soo guurtay. Haddii aanad haynin meesha lagala xidhiidhayo, nala soo xidhiidh si aan kaaga gargaarno. Waxaad nagala soo xidhiidhi kartaa **khadka bilaashka ah: 0800 085 6087;** ogow lambarkan waxa laga soo wici karaa talefon guri oo keli ah.

Dhibaatooyinka ay tahay **in** la soo sheego waxay ku jira, laakiin aan ku ekayn, waxyaaba ku yaal jaantuska hoose. Tusaalooyinkan waxa ku jira qiyaasta wakhtiga looga jawaabi karo dhibta.

Arrinta	**Jawaab/wakhtiga smaynta**
Xaalad nololeed oo aan ammaan ahayn sida gaas liigaya, daad ama waxyeelo dab	Jawaab 2 saac gudahood marka dhibta la soo sheegay
Xaalad adag oo nololeed sida la'aanta biyo kulul, la'aanta tamar dab ama qiiq sheegaha oo aan shaqaynayn	Jawaab 24 saac gudahood marka dhibta la soo sheegay
Xaalado dhibaatooyin nololeed oo degdeg ah sida wax yar oo awdmay, dayactrir ama dariishad furmi weyday	Jawaab 24 saac gudahood marka dhibta la soo sheegay; lagu sameeyo 7 maalmood gudahood
Arrimaha joogtada ah sida qasaalada dharka oo aan shaqaynayn, alaabta guriga oo u baahan beddelaad ama dayactir dibedda ah oo loo baahan yahay	Dhibta lagu xalliyo 28 maalmood gudahood marka la soo sheego dhibta

Waa muhiim in la xasuusto inaad xaq u leedahay inaad ku noolaato nadiif, ammaan iyo meel sugan. Waa in aanad ku sugnaan halis jidhk, hantida oo ka timaad walxaha guriga ku yaal, ama jiiraanka ama dad kale.

Haddii hantiilaha hoygaagu aanu hagaajin dhibta, waan la xidhiidhi doonaa si aanu u helno sababta dhibta loo xallin waayey ama, haddii ay haboon tahay, la xidhiidh Hoom Ofiska.

Muxuu hantiilaha hoygu mas'uul ka yahay?

Sugidda ammaanka iyo nadaafadda hoyga ka sokow, hantiilahaaga waxa xil ka saran yahay in:

- Kugu siiyo 'hanuunin kooban' marka aad timaad luqad aad fahmayso. Tan wax ku jira tusitdda hoyga, sharxidda sida loo isticmaalo alaabta iyo qeexidda faahfaahinta heshiiska;
- Uu kuu keeno turjubaan marka aad u baahato mid;
- Ku siiyo faahfaahinta sidaad ula xidhiidhi lahayd markay timaad xaalad degdeg ah;
- Uu qabanqaabiyo oo bixiyo dayactirka alaabta, hagaajinta qalabka, qasabadaha iyo dhibta dhiska meeshii muuqata aan ku imaan si xun u isticmaal xagiina ka yimaad;
- Uu qoraal ahaan kuugu sharxo sida iyo goorta cabashada lala tacaalo. Tani waxay caddayn doontaa inaad u sheegtay dhib/ cabasho; iyo
- Uu kaga jawaabo cabashooyinkaaga la xidhiidha hoyga wakhti macquul ah. Ogow in wakhtigu isbedali karo taas oo ku xidhan ba'naanta dhibta oo marmar ay qaadan karto 28 maalmood in lagu xalliyo. Ka fiiri jaantuska bogga hore ee xaashidan wixii faahfaahin ah.

Maxaan sameeyaa haddii aan la kulmo handidaad, waxyeelayn ama weerar?

Hoy kasta oo aad ku jirto, waxaad xaq u leedahay inaad ku noolaato ammaan, aan cabsi handidaad ama waxyeelo lahayn. Haddii cid si xun kuula dhaqanto sababo ku aaddan midabka, jinsiga, sinjiga, galmadaada ama asalkaaga waa denbi weyn oo mamnuuc ah.

Waxa ugu horreeya ee aad samaynaysaa waa inaad la xidhiidho booliiska oo u sheegto waxa dhacay; iyaga ayaa baadhi dhacdada. Kala xidhiidhi kartaa Boolisska Strathclyde 0141 532 2000 oo iyaga ayaa kuu sheegi xidhiidhka booliiska degaankaaga oo kaa gargaari doona warbixinta.

Haddii aanad awoodin ama aanad rabin inaad toos ula hadasho booliska, waad nala soo xidhiidhi kartaa si aan kaaga gargaarno warbixinta denbiga si asturan oo, haddii ay haboon tahay, waxaanu kula xidhiidhsiin ururaro ku siin doona taageero niyadeed.

Waa muhiim in aad xogayso wixii handidaad jinso ku salaysan, waxyeelo ama weerar.
Waa inaad:

- ka samee qoraal waxa dhacay, oo uu ku jiro wakhtiga, taariikhda iyo meesha ay ka dhacday
- hay wixii qoraalo, waraaqo, text ama iimaylo laguu soo diray
- la hadasho dad kale (tusaale, jiiraan ama kirayste kale) oo laga yaabo inay saamayn ku yeesheen dhaqanka qofkaasi.